## Maxa dhaca haddii qofka uu ku dhaco cudurka qaaxada ee tiibiidu? (vad händer om man fått tuberkulos?)

Marka qofku uu u bukoodo cudurka qaaxada waxa lagu daweeyaa dawada qaaxada ee tiibiida. Daawadu way daweysaa qofkuna wuu caafimaada. Waxayna qaadataa ugu yaraan 6 bilood.

Marka la tixraaco qaanuunka ka hortagga isqaadsiinta cudurrada qofka wuxuu xil ka saaran yahay in uu raaco oo ku socdo sida dhakhtarku uu dawada u qorsheeyey isla markaana uu dhakktarka yimaado si loola socdo oo loo kantaroolo.

## Waa maxay raadraaca ama daba galka la sameeyo haddii cudurka dad kale la qaadsiiyey? (vad innebär smittspårning?)

Marka qof uu u bukoodo cudurka qaaxada ayaa waxa la sameeyaa raadraaca ama dabagalka in cudurka dad kale la qaadsiiyey si loo helo bal in dad kale ay qaadeen ama ay qaadi karaan. Baadhitaanka waxa lagu sameeyaa iyada oo jidhka ama haragga qofka tijaabo lagu sameeyo iyo/ama sambabada oo la sawiro. Raadraac fiican oo la sameeyaa waa muhiim si loo joojiyo fidida cudurka qaaxada. Mararka la tixraaxo qaanuunka ka hortagga cudurada la is qaadsiiyo ayaa labada qofka buka iyo dadka baadhitaanka lagu sameeyaaba uu xil ka saaran yahay in ay arrintaas ka qayb qaataan.

## Ma layska tallaali karaa cudurka qaaxada ama tiibiida? (kan man vaccinera sig mot tuberkulos?)

Tallaalka cudurka qaaxadu wuxuu daafacaa dhammaan noocyada ugu khatarsan ee qaaxada ee ku dhaca xuubka maskaxda ku dahaa-ran laakiin aad aan wax uga tarin qaaxada ku dhacda sambabada. Waxaa si gaar ah xasaasi ugu ah carruurta. Iswidhanna waxaa laga tallaalaa carruurta looga baqayo in ay cudurka qaadaan, tusaale ahaan haddii carruurtu ay la kulmaan ama ay booqasho ugu tagaan qaraabadooda deggan dal kale oo ay qaaxadu caadi ka tahay.

## Halkuu qofku iskaga baadhi karaa cudurka qaaxada? (var kan man undersöka sig för tuberkulos?)

Baadhitaanka cudurka qaaxada waxa lagu sameeyaa rugta dary-eelka caafimaadka, qaybaha cudurada infakshanka iyo isbitaalada carruurta. Haddaba waxaa muhiim ah in qofku sheego haddii uu cudurka qaaxada horay u soo qaaday qaaxada mar walba bukoodo oo daaweyn soo doonto. Cudurka qaaxada waxaa lagu daweyn karaa daawada.

## Ma dooneysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato?

Waxaad kala xidhiidhi karataa Bogagga Internetka ee rugta ka hortagga isqaadsiinta cudurrada ee cinwaankoodu yahay:

**1177 Vårdguiden:**
www.1177.se

**Hay'adda caafimaadka dadweynaha (Folkhälsomyndigheten FoHM):**
www.folkhalsomyndigheten.se

**Ururka caafimaadka adduunka ee WHO (Världshälsoorganisationen WHO):**
www.who.int/topics/tuberculosis/en

## Su'aalaha la xiriira isqaadsiinta cudurka qaaxada:

Smittskyddsenheten
Tel. 060-13 52 41
epost: smittskyddsenheten@lvn.se

*Qoraalkaan asal ahaan soo saaray Smittskydd Stockholm, ee maamulka gobolka Stockholm. Waxaana loogu talagalay Maamulka gobolka iyadoo ruqsadda lagu daabacay laga helay Smittskydd Stockholm.*

Landstinget Västernorrland

SOMALISKA

# Cudurka qaaxada

WARBIXIN KU SAABSAN
Isqaadsiinta
Astaamaha cudurka
Baaritaanka cudurka
Daaweynta ama wax ka qabashada

Landstinget Västernorrland

## Waa maxay cudurka qaaxadu?
## (vad är tuberkulos?)

Cudurka qaaxada ama tiibishadu (tbc) waa cudur la kala qaado oo ay keento bakteeriyada loo yaqaan Mycobacterium tuberculosis. Waxay badanaa keentaa caabuq xagga sambabada ah, laakiin haddana waxay bakteeriyadaasi waxyeello gaarsiin kartaa qaybaha kale ee jirka sida, qanjirada dheecaanada, saableyda, maskaxda iyo kalyaha.

Qaybo badan oo adduunka ka mid ah ayuu cudurka qaaxadu caadi ka yahay, waxaana sannad walba cudurkaas u dhinta 2 malyan oo qof. Waddanka Iswidhan waxa cudurka sannad walba u bukooda dad lagu qiyaasay 600 ilaa 700 oo qof. Boqolkiiba toban dadka qaada cudurka qaaxada waxay muujiyaan astaamaha cudurka, halka ay qaar kalena qaadaan bakteeriyo aan hawlgal ku su jirin iyagoo aan muujin wax astaamo ah.

## Sidee loo kala qaadaa cudurka qaaxada?
## (hur smittar tuberkulos?)

Cudurka qaaxada waxaa laga qaadaa dadka waaweyn ee uu sambabada cudurku ka haleelay. Bakteeriyada waxaa fidiya oo ay soo raacdaa hawada marka qofka qabaa qufaco ama hindhiso.

Cudurka qaaxada laguma kala qaado cuntada, isticmaalka weelka maacuunka ah, dharka iyo waxyaalaha kale. Inta badan waxaa cudurka qaada qofka u dhow qof cudurka qaba, tusaale ahaan dadka la isla deggan yahay guriga ama waalidiinta oo qaadsiiya carruurtooda.

## Maxaa u dhexeeya in la qaado cudurka qaaxada iyo in qof u bukoodo cudurka qaaxada?
## (vad är skillnaden mellan att vara smittad av tuberkulos och sjuk med tuberkulos?)

Dadka la xanuunsada ama bukooda cudurka qaaxada waxaa jidhkiisa ku jira bakteeriyo aad u badan oo ka hawlgasha jidhkiisa. Dadkaasi sida caadiga ah waxay qabaan oo lagu arkaa calaamadaha lagu yaqaan cudurkaas qaaxada, haddii cudurkaas qaaxadu uu hayo sombobada kolkaas qofkaasi wuxuu cudurka qaadsiin karaa dadka kale. Cudurka qaaxada waxa lagu daweyn karaa dawo. Haddii cudurka qaaxada aan la daweyn taasi waxay keeni kartaa in cudurku uu keeno dhaawacyo joogta ah iyo dhimisho.

Qofka la qabadsiiyey cudurka laakiin aan bukini wuxu leeyahay oo uu qabaa qaaxada loo yaqaan latent (waa qaaxada dahsoon). Tirada bakteeriyadu aad ayey u yartahay mana aha mid hawl ku jirta. Sidaas awgeed ayaanu qofku  u bukin oo cidna aanu u qabadsiin karin. Mar uun waa dambe inta uu qofku nool yahay ayey bakteeriyadu shaqadeeda bilowdaa dabadeed uu qofku bukoodaa. Sidaas awgeed ayaa xitaa dawada loo siiyaa qofka cudurka la qaadsiiyey si ay uga hortagto in qofku waa damabe uu bukoodo, taas oo loogu yeedho daaweynta ka hortagga ah.

## Ayuu ku dhacaa cudurka qaaxada ee tiibiidu?
## (vem får tuberkulos?)

Cid kasataba waa la qaadsiin karaa cudurka qaaxada ee tiibiida. Khatarta ah in qofku uu hadhow bukoodo waxa khatar weyn ugu jira carruurta yar yar iyo dadka uu jilicsan yahay dheecaankooda daafacu, tusaale ahaan sida dadka qaaday  cudurka HIV, dadka qaata dawada xoojinta dheecaanka daafaca ee lakiin xitaa si xun u isticmaala khamriga ama maandooriyayaasha kale. Wakhtiga qofku uu cudurka qaaaday waxay noqon kartaa mid muddo hore ah inta cudurku aanu qofka ku qarxin.

## Waa kuwee calaamadaha ama waxyaabaha lagu yaqaano qaaxada? (vilka är symptomen?)

Calaamadaha caadiga ah ee lagu yaqaanno dadka waaweyn ee qaba cudurka qaaxadu waxa weeyi qufac, laab xanuun aan dhammaan toddobaadyo badan xitaa haddii qofka la siiyo dawada antibaayootigga. Calaamadaha kale ee lagu yaqaanno cudurka qaaxadu waxa weeyi xummad, qofka oo cunta xumaysta, miisaanka qofka oo hoos u dhaca, habeenkii oo uu qofku dhidido iyo qofka oo si daallan u hadla ayaa ah calaamadaha kale ee caadiga ah ee lagu yaqaanno.

Haddii qofku cudurka qaaxada uu ka qabo meelo kale oo aan ahayn sambabada kolkaas meelahaas ayaa calaamadaha cudurkaas laga helaa, tusaale ahaan qanjidhada dhareerrada oo barara, dhabarxanuun iyo madax-xanuun.

Carruurta marka ay qaaxadu ku dhacdo badanaa waxay ku keentaa xummad iyo mararka qaarkood caalamad la mid ah ta asmada iyo qanjidhada dheecaanka oo barara.

## Sidee ayuu qofku ku ogaanayaa haddii uu qaaday qaaxo/tiibisho?  (hur vet man om man fått tuberkulos?)

Haddii qofku ka shakiyo inuu qaaday qaaxo, waxa laga qaadaa tijaabo xagga difaaca ah iyo sawirka sambabada. Tijaabada difaaca waxa loo samayn karaa baaritaan-maqaar ahaaneed (tijaabada tuberkulin; PPD) ama sidii shaybaar dhiig ahaaneed (IGRA; Quantiferon).  Haddii baaritaannadaasi caddeeyaan shakigii qaaxada, waxa shaybaar laga qaadayaa neefta qofku qufaco ama meelaha kale ee leh astaamo lagu garan karo si jeermiska loo kobciyo.

## Sidee ayey u shaqeeyaan tijaabooyinka difaacu?
## (hur fungerar immuntesterna?)

Tijaabada Tuberkulin waa shaybaar-maqaar oo borotiin laga soo qaaday jeermiska tuberkel lagu durayo maqaarka. Haddii qofku qabo cudurka qaaxada, wuxu caadi ahaan helayaa falcelin ah maqaar-barar. Tijaabada Tuberkel, waxay sheegi kartaa in wax jiraan xiitaa ayada oo aanu qofku qabin qaaxo.

Tijaabada IGRA (Quantiferon) waxa lagu baaraa shaybaar-dhiig haddii dhiiggu ka falceliyo maaddooyinka ka yimid jeermiska qaaxada. Laakiin waxay qaadan kartaa ilaa laba bilood markii cudurka la qaaday ka dib inta tijaabooyinku heli karaan wax.